

# Xaalad caadi ah oo leh heegan dheeraad ah

Dawladdu waxa ay cusboonaysiisay istiraatijiyadda fog iyo qorshaha heeganka ee loogu talagalay maaraynta safmarka koroonaha, waxaana wejiga ku xiga heerka afaraad loo bixiyay «Xaalad caadi ah oo leh heegan dheeraad ah»

Istiraatijiyadda dawladdu waa in safmarka covid-19 loo maareeyo hab keenaya in mar kasta la xakamayn karo faafidda cudurka, si faafidda u noqoto mid la maarayn karo oo aan ka badnayn awoodda adeegyada caafimaadka iyo daryeelka.

## **Heerka 4-aad kaddib**

– Kaddib marka aynu ka baxno heerka 4-aad, waxa laga gudbayaa istiraatijiyad hubin ah waxaana loo gudbayaa istiraatijiyad heegan ah.

Marka ugu horreysa ee la eegi doono in loo gudbi karo wejigaas loo bixiyay «xaalad caadi ah oo leh heegan dheeraad ah» waa bilowga Sebtember, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg. Wejiga «xaalad caadi ah oo leh heegan dheeraad ah» waxaa lagu soo koobi karaa laba qodob:

- Cudurkan safmarka wax badan ma saamayn doono nololsha caadiga ah ee dadka. Waxase loo bahaan yahay in weli la ilaaliyo nadaafadda gacmaha iyo qufaca, oo guriga la joogo haddii la xanuunsado, islamarkaana tijaabo la iska qaado haddii talooyinku sidaa sheegaan. Laakiin waxa meesha ka baxaya tallaabooyinkii gaarka ahaa ee loogu talagalay covid-19.
- Islamarkaana hay'adaha degmooyinka iyo kuwa heerka qaran ayaa si dhow ula socon doona isbeddellada yimaada, si markiiba tallaabo loo qaadi karo haddii xaaladdu isbeddesho. Dawladda, hay'adaha caafimaadka, cisbitaallada iyo degmooyinku waxay samaynayaan la socosho iyo heegan dheeraad ah.

– Waxannu sii wadaynaa hadafyadii ku saabsanaa in la ilaaliyo caafimaadka, in la yareeyo khalkhalka ku imanaya bulshada iyo in la ilaaliyo dhaqaalaha. Carruurta iyo dhallinyarada ayaa weli mudnaanta la siinaya, kaddibna waxa ku xiga shaqooyinka iyo ganacsiga, ayay tidhi Solberg.

## **Feejignaanta hay'adaha dawladda**

Barnaamijka tallaalka koroonaha ee Norway wuxu u socdaa si dhakhso ah, oo in ka badan boqolkiiba 60 dhammaan dadka 18 sanno ka weyn ayaa hadda qaatay irbadii koowaad ee tallaalka. Difaaca dadku ka helayo tallaalka ayay u badan tahay in uu ku filan yahay xakamaynta cudurkan safmarka ah, waxaanu marka dambe beddeli karaa tallaabooyinkii lagu yaraynayay isu-dhawaanshaha dadka, TISK (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raad-raacid iyo karantiil) iyo inta badan tallabooyinka khuseeya soo gelidda waddanka.

– Marka ay sii kordhaan dadka la tallaalay waxa si tartiib-tartiib ah loo yarayn karaa tallaabooyinkii lagu maaraynayey cudurkan safmarka ah, si bulshadu markaa u geli karto xaalad caadi ah. Si kastaba waa in degmooyinka iyo dawladdu feejignaadaan oo la socdaan isbeddellada imanaya, si markiiba tallaabooyin loo soo rogi karo haddii xaaladdu isbeddesho. Waxa loo baahan yahay in la xoojiyo la socoshada xaaladda iyo heeganka si markiiba loo soo rogi karo tallaabooyin ka hortag ah haddii loo baahdo, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo heeganka.

Waxa wacan in degmooyinka iyo meelaha kaleba ay qorshaha ku darsadaan in ay xilliga deyrta 2021 haystaan aqoonta iyo heeganka lagama maarmaanka ah si ay degdeg u kordhin karaan shaqaalaha loo baahan yahay haddii is-qaadisiinta cudurku kor u kacdo islamarkaana uu sii kordho culayska ka imanaya cudurku. Degmooyinku waa in ay in muddo ah awoodi karaan hawlaha tallaalka iyo TISK.

## **Xalaada iman kara xilliga deyrta/qaboobaha 2021**

Machadka Caafimaadka Dadweynaha iyo Agaasinka Caafimaadku waxa ay diyaariyeen qorshe ku saabsan saddex xaaladood oo iman kara deyrta/qaboobaha 2021. Xalaadahan iman kara maaha saadaal, laakiin waxay sawir ka bixinayaan sida cudurkan safmarka ah noqon karo haddii ay buuxsamaan shuruuddo gaar ahi. Xaaladda 2-aad ayaa loo arkaa in ay tahay ta ugu macquulsan, laakiin xataa xaaladda 1-aad ayaa ah wax suurtaggal ah. Haddii xaaladda 3-aad timaado waa in wax weyn laga beddelo habka loo maaraynayo cudurkan safmarka ah.

Xalaadahani maaha kuwo aan hal mar wada iman karin:

### **Xaaladda 1-aad:**

Tallaalka dadka lagula talinayo in ay is tallaalaan ayaa laga helayaa difaac wacan oo muddo dheer soconaya oo ka hortagaya is-qaadsiinta iyo in lagu bukoodo cudurka. Dadku si weyn ayay u taageersan yihiin barnaamijka tallaalka. Waxa sii kordhaya qaybta dadka tallaalan ee

Yurub waxaana imanaya xal caalami ah oo soo dedejinaya in waddamada dhaqaalahoodu hooseeyo ama dhexdhexaad yahay ay helaan tallaalka. Si tartiib-tartiib ah ayaa loo joojin karaa tallaabooyinka lagaga hortagayo cudurka ka imanaya dibeddaha.

Ma iman doonaan noocyo cusub oo fayrus ah oo waxyeeli kara difaacii ay heleen dadka si buuxda loo tallaalay. Adeegyada caafimaadka iyo daryeelku waxa ay awoodaan in ay shaqadooda u wataan si ku dhow sidii caadiga ahayd, laakiin waxa si xoog ah u iman kara hargabkii sannadlaha ahaa iyo infekshanno kale oo hawo-mareennada ku dhaca. Waxa yar inta jeer ee cudurku ka dhex dhillaacayo dadka aan la tallaalin, weliba dadka dhallinyarada ah, taasoo yaraynaysa dadka aad ugu xanuunsanaya cudurka. Haddii cudurku meel ka dillaaco, waxa si ku habboon u maarayn doona degmada oo isticmaalaysa tallabooyin u gaar ah. Covid-19 waxa uu marka dambe noqon doonaa cudur loo maareeyo si la mid ah infekshannada kale ee meelo ku kooban (oo hargabku ku jro), oo ah in lala socdo, in dadka la tallaalo iyo in lagu dhaqmo talooyin guud oo nadaafadda ku saabsan.

### **Xaaladda 2-aad:**

Tallaalidda dadku waxay u socotaa si dhakhso ah xagaaga oo dhan, kaddib markii degmooyinku sameeyeen dedaallo aan yarayn. Marka la gaadho dhammaadka xagaaga waxa yar meelaha cudurku ka dillaacayo Norway, islamarkaana waxa marba marka ka dambaysa sii yaraanaya is-qaadsiinta cudurka ee ka jirta waddamada Yurub ee la tallaalay qayb badan oo dadkooda ka mid ah. Dhinaca caalamka waxa la qabaa werwer ku saabsan nooc cusub oo fayruska ah oo tallaalku si buuxda uga difaacayn dadka. Waxa loo baahan karaa tallaabooyin khuseeya soo gelidda waddanka. Hal ama dhowr nooc fayruus oo cusub oo is-qaadsiintoodu ka fududdahay sidii kuwii hore, oo tallaalku si buuxda u difaacayn oo islamarkaana keeni kara inay kordhaan dadka cisbitaal la dhigayo, ayaa ku faafaya Norway.

Waxa kordhaya faafidda cudurka bulshada dhexdeeda, gaar ahaan dadka dhallinyarada ah dhexdooda. Waxa kordhaya inta jeer ee cudurku ka dillaacayo xarumaha bukaanka. Islamarkaana hargabka sannadlaha oo si xoog ah ugu dhacay dadka iyo infekshanno kale oo hawo-mareennada ku dhacay ayaa culays ku keenaya adeegyada caafimaadka iyo daryeelka. Awooddii degmooyinka ayaa culays ku imanayaa, laakiin cudurka ka dhex dillaaca waxa loo maaraynayaa si aan dhib badan lahayn iyadoo la isticmaalayo tallaabooyin degmada ku kooban.

### **Xaaladda 3-aad:**

Dhallinyaradu tallaalka ma u qaadato si la mid ah dadka waaweyn.

Caalamka waxa ka jira nooc fayrus ah oo cusub oo difaaci ay dadku ka helayeen tallaalladu uu aad uga yar yahay sidii hore. Waxa lagama maarmaan noqonaysaa tallaabooyin khuseeya soo gelidda waddanka. Bannaanbaxyo waaweyn ayaa ka socda Yurub maadaama dadku ka daaleen tallaabooyinka ka hortagga cudurka. Nooc fayrus ah oo tallaalku si wacan dadka uga difaacayn oo islamarkaana keenaya in aad loogu bukoodo, ayaa noqonaya nooca ugu badan ee dadka Norway jooga qaadayaan xilliga deyrta.

Mawjad cudurka ah oo imanaysa deyrta ayaa gaadhaysa dadkoo dhan, kuna keeni karta xanuun daran. Degmooyin badan ayuu cudurku ka dillaacayaa. Isla markaana hargabka sannadlaha ah iyo infekshanno kale oo hawo-mareenka ku dhaca ayaa culays weyn ku keenaya cisbitaallada iyo adeegyada caafimaadka ee degmooyinka. Waxa qasab noqonaysa in la soo rogo tallaabooyin ka hortag cudur ah oo heer qaran ah, si looga hortago in culaysyo xad-dhaaf ah ku yimaadaan adeegyada caafimaadka iyo daryeelka iyo awoodda degmooyinku u leeyihiin in ay qabtaan hawlaha TISK oo la sii xoojiyay.

Dadweynaha Norway ayaa iyaguna ka daalay tallaabooyinka ka hortagga oo bannaanbaxyo ayaa dhaca. Waxa qasab noqonaysa in dadkii la tallaalay loo fidiyo irbad kale oo ah tallaalkii oo wax laga beddelay. Tallaalkaasi waxa uu diyaar noqonayaa bilowga 2022, laakiin waxa yar tallaalka la helayo markaa waxa dadka loo kala horreysiin doonaa sida ay u kala mudan yihiin.